



## Diiwaanka Ardayga iyo Xuquuqda aad Leedahay

### Ogaysiis ku Saabsan Xuquuqda Xeerka FERPA Iyo Kan Dowladda Gobolka Minnesota Ee Ku Aadan Macluumaadka Ardayda

Xeerka xuquuqda Qoysaska ee ku aaddan Waxbarashada Macluumaadka gaarka ah ee Ardayda ee marka la soo gaabiyo loo yaqaano FERPA iyo midka dowladda gobolka Minnesota ee ku saabsan ilaalinta macluumaadka gaarka ah ayaa waxay waalidiinta iyo ardayda ay da'dooda tahay 18 sano jir iyo wixii ka weyn siinayaan xuquuq dhowr ah oo ku saabsan daalacashada iyo wax-kabedelidda diiwaanka waxbarasho ee ardayda. Xuquuqaahaasi waxaa ka mid ah:

1. Waalidiinta waxay xeerarkaasi siinayaan xuquuq ah in ay baari karaan oo ay dib u eegi karaan diiwaanka ardaydooda 10 cisho markay ka soo wareegto maalinta ay iskuullada degmada Saint Paul ay walidkaasi ka helaan codsi uu ku doonayo diiwaankaas.  
  
Hadii ay waalidiinta ama ardayda damcaan in ay dib u eegaan diiwaanka waxbarashada ee ardayga waa in ay maamulaha iskuulka u soo gudbiyaan codsi qoraal ah oo cadaynaya diiwaanka ay doonayaan in ay helaan. Maamulaha iskuulka ayaa intaas ka dib guda gali qorsha ah in uu ardayga iyo waalidka u sheego goorta iyo halka lagu sameynayo dib-u-eegida diiwaanka ardayda. Macluumaad dheeri ah ka eeg Buugga Nidaamka ee Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul oo aad ka heli kartid bartan [304.1.4 Access to Data for Individual Data Subjects](#)
2. In ay waalidka ama ardayga ay xaq u leeyihiin in ay dalbadaan in diiwaanka ardayga dib loo saxo hadii uu waalidka ama ardayga ay dareemaan in diiwaanka ardayga uusan ahayn mid sax ah, mid uu ku jiro macluumaad marin habaabin ah ama wax u dhimaya xuquuqda ardayga ee ku saabsan macluumaadkiisa gaarka ah.  
  
Waalidka ama ardayga codsanaya in diiwaanka ardayga ee Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul dib loo saxo waa in ay qoraal ahaan maamulaha iskuulka ugu soo gudbiyaan oo ay soo qayaxaan qeybta diiwaanka ee ay doonayaan in la bedelo iyo sababta ay u doonayaan in loo bedelo. Haddii ay iskuulada degmada ay go'aansadaan in aysan bedelin diiwaanka uu waalidka ama ardayga dalbaday, waa in ay go'aankoodaasi ku wargaliyaan waalidka ama ardayga isla markaasna ay u sheegaan in ay xaq u leeyihiin in ay dalbadaan in codsigooda la dhagasto. Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan arintaan wuxuu ku daabacanyahay Buugga Nidaamka ee Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul oo sidoo kalena laga helo karo bartan [304.00.2 Request to Amend Student Records: Procedures to Challenge Data](#)
3. In qoraal la idinku weydiisto ka hor inta uu iskuulka soo shaacinin macluumaad uu ka soo xigtay diiwaanka ardayga oo si toos ah loola xiriirin karo ama lagu garan karo ardayga, marka laga reebo ilaa xadka uu sharcigu u fasaxayo sii daynta macluumaadkaas codsi la'aan.
4. Waalidka wuxuu xaq u leeyahay in dacwo ka dhan ah Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul oo ku saabsan xadgudub ku aadan xeerka FERPA uu u gudbin karo Wasaarada Tacliinta ee Dowladda Federaalka. Magaca iyo cinwaanka xafiiska dhaqan galiya xeerka FERPA waa:

Family Policy Compliance Office  
U.S. Department of Education  
400 Maryland Avenue, SW  
Washington, DC 20202

Xeerka FERPA ee uu tirsigiisu yahay § 99.31 wuxuu banaynayaa shaacinta diiwaanka waxbarasho ee ardayga iyada oo aanan waalidka laga dalbanin fasax haddii ay shaacintu ku sifowdo shuruudo gaar ah. Marka laga reebo shaqaalaha iskuulka, codsi maxkamadeed iyo waalidka ama ardayga, nidaamka FERPA ee uu tirsigiisu yahay § 99.32 wuxuu iskuullada ka doonayaan in ay diiwaan-galiyaan qaababka iyo heerka ay diiwaanka ardayga ku shaciyeen. Waalidiinta ama ardayduba waxay xaq u leeyihiin in ay dib u eegaan oo ay arkaan shaacinta diiwaannada waxbarashada ee ardayga. Hoos waxaa ku xusan xaaladaha sababi kara in diiwaanka ardayga la shaaciyo fasax la'aan.

- Haddii ay diiwaanka dalbadaan shaqaalaha iskuulka oo ay ka mid yihiin shaqaalaha iskuullada degmada, macalimiinta, iyo shaqaalaha kale ee ururrada tacliinta iyo hay'adaha uu iskuulku u garto in ay si xaq ah u danaynayaan diiwaanka waxbarasho ee ardayga. Shaqaalahani waxaa ka mid ah qandaraaslayaasha, la-taliyayaasha, mutadhawiciinta iyo ururrada kale ee iskuulka kala shaqeeya howlaha, waa haddii ay shakhsiyaadkaasi iyo ururadaasi buuxiyaan shuruudaha ku xusan § 99.31(a)(1)(i)(B)(1) - (a)(1)(i)(B)(3) iyo (§ 99.31(a)(1)).
- Diiwaanka waxaa sidoo kale fasax la'aan loo gudbin karaa iskuullada kale ama mac'hadyada iyo kuliyaadaha waxbarasho ee uu ardayga doonayo in uu ku biiro ama uu markaaba dhigto haddii ay shaacintu ku saabsantahay sii wadashada waxbarashada ee ardayga waa hadii ay shaacintu buuxiso shuruudaha § 99.34. (§ 99.31(a)(2)).
- Diiwaanka ardayga waxaa sidoo kale fasax la'aan loo gudbin karaa shaqaalaha degmada iyo kuwa maxalliga ah kuwaas oo wato cadaymo u fasaxaya in ay diiwaanka ardayga u adeegsadaan in ay ardayga kaga caawiyaan nidaamka cadaaladda iyo garsoorka inta aanan ardayga go'aan laga gaarin haddii uu codsigoodu buuxiyo shuruudaha § 99.38. (§ 99.31(a)(5))

- Diiwaanka ardayga waxaa sidoo kale fasax la'aan loo gudbin karaa ururrada iskuulka u samaynaya cilmi-baaris ay doonayaan in ay: (a) ku abuuraa ama ay ku sameeyaan baritaano saadaal ah; (b) ama ay ku dhisaan barmaamij ardayda caawiinaya ama ay (c) ku horumarinayaan waxbarashada iyo casharrada waa haddii ay shaacintaansi buuxiso shuruudaha ku cad (§ 99.31(a)(6))
- Diiwaanka ardayga waxaa sidoo kale fasax la'aan loo gudbin karaa haddii ay maxkamad si sharci ahaan u soo dalbato uu dalabkaasi buuxiyo shuruudaha looga baahan yahay. (§ 99.31(a)(9))
- Diiwaanka ardayga waxaa sidoo kale fasax la'aan loo gudbin karaa qeybaha ku hawlan gurmadka deg-dega ah ee ku saabsan caafimaadka iyo aminga waa haddii ay buuxiyaan shuruudaha ku cad § 99.36. (§ 99.31(a)(10))
- Diiwaanka ardayga waxaa sidoo kale fasax la'aan loo gudbin karaa wakiillada ka socda xubnaha dowladda gobolka iyo kuwa maxalliga ah ee ku hawlan daryeelka caruurta kuwaas oo uu qaanuunka gobolka iyo kan qabaliga ah uu diiwaanka ardayga oogu oggolaaday in ay mas'uul ka yihiin daryeel iyo ilaalinta ardayga ay diiwaankiisa doonayaan. (20 U.S.C. § 1232g(b)(1)(L))
- Diiwaanka ardayga waxaa sidoo kale fasax la'aan la gudbin karaa haddii shuruudaha qodobada sharcigan § 99.37 lagu dabaqo. (§ 99.31(a)(11))

### Ogeysiiska Diiwaanka Macluumaadka

Diiwaanka Macluumaadku waa macluumaad dadweynaha u dhexeeya lana gudbin karo fasax la'aan. Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul waxay u aqoonsantahay waxyaabaha soo socda inay yihiin macluumaad dadweyne:

- Magaca
- Taariikhda Dhalashada
- Fasalka
- Iskuulka
- Taariikaha Diiwaan-galinta
- Abaal marinada sida qalinjabin ama shahaado dugsi sare haddii aad heshay
- Waxqabad Hiwaayadeed ka baxsan manhajka

Ujeedada diiwaanka macluumaadku waa u ogalaanshaha Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul inay ku daraan diiwaanka waxbarasho ee ilmahaaga daabacaadyada degmadu samayso, sida iyo kuwa kale ee abaal marinada, kuwa ciyaaraha iyo qalin jabinta IWL.

Marka laga soo tago macluumaadka ku jira liiska sare, hoos waxaa ku xusan macluumaad loo qoondeeyay in ay ka mid noqdaan macluumaadka dadweynaha, waxay khuseeyaan shakhsiyaadka hoos ku cad:

	Cinwaanka	Telefoonka Guriga	Nambarka aqoonsiga ee ardayga	Nambarka ID-ga gobalka	Jinsiyada ardayga	Cinwaanka Emailka ee ardayga	Magaca Waalidka/Masuulka	Jadwalka Fasalka
Kuwa militiriga ka diiwaan-galiya ardayda dhigata iskuullada sare	X	X				X		
Maktabadaha Bulshada ee gobolka Minnesota	X	X	X			X		
Shaqaalaha ilaha ee Iskuullada	X	X					X	X
Baska gobalka			x					
Xafiiska waxbarashada sare ee Minnesota				x	x			

Waalidiinta/Masuuliyiinta doonaya inay ka baxaan siidaynta diiwaanka macluumaadka waa inay si qoraal ah u soo ogaysiiyaan Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul. Foomamka ka bixidda diwwanka macluumaadka waxaa laga heli karaa <http://spps.org/studentrecords> ama inaad wacdo Xarunta Diiwaanka Ardayda ee taleefankeedu yahay (651) 632-3764.

Wixii su'aalo ah oo ku saabsan diwwanka ardayda, fadlan la xiriir:

Diiwaanka Ardayda, Xarunta Meelaynta Ardayda

2102 University Avenue W  
Saint Paul, MN 55114  
(651) 632-3764